

Degmada adkaysiga leh ee Dooxada Duwamish

Nagu soo biir adoo ka qayb qaadanaya iskaashiga qaybaha kala duwan ee dadka deggan Dooxada Duwamish iyo ganacsiyada si ay u horumaraan.

Waa maxay Degmo adkeysiga leh?

Degmo adkeysiga leh waa hindise cusub oo loogu diyaar garoobayo, loogu adkaysanayo, loolana qabsanayo, loolana soo kabanayo caqabadaha ka imanaya:

- arimaha deegaanka
- isbedelka cimilada
- cadaadiska dhaqaale ee barakaca

Adkeysiga bulshadu waa awoodda wax looga qabanayo saameyntan iyo in la kordhiyo faa'iidooyinka maal-gashiga socda iyo kuwa mustaqbalka ee Dooxada Duwamish.

Magaaladu waxa ay bilaabaysaa in ay qorshayso kor u qaadidda heerka badda dhawrka sano ee soo socda. Waxaan ku dadaali doonnaa inaan hubinno la qabsiga kor u kaca heerka badda ee Dooxada Duwamish waxay ku saleysan tahay adkeysiga bulshada: awoodda bulshada iyo dhisidda hantida maanta ayaa muhiim u ah kaabayaasha la farsameeyay si looga jawaabo saameynta isbeddelka cimilada berrito.

Dhawrka sano ee soo socda, Magaaladu waxay la shaqayn doontaa dadka deegaanka iyo ganacsatada si ay u horumariyaan qaabdhismeedka abaabulka bulshada, hababka maalgelinta, iyo maalgelinta kaabayaasha si loo hubiyo in qoysaska iyo ganacsiyadu ay ku horumaraan meeshooda.

Go'aan-qaadasho ay bulshadu wadato

Waxaad caawin kartaa samaynta go'aamo ku saabsan abuurista Degmo adkeysiga leh. Magaaladu waxay hawlgelin doontaa shuraakada South Park iyo Georgetown si ay u horumariyaan aragtida la wadaago ee Degmo adkaysiga leh iyagoo sahaminaya xeeladaha go'aan ka gaadhista bulshada iyo abaabulka, la qabsiga kor u kaca heerka badda, iyo maalgelinta. Shaqadani waxay sare u qaadi doontaa codadka kuwa ay sida aadka ah u saamaysay sinaan la'aanta si loo hubiyo in go'aamadu ay faa'iido u leeyihiin dhammaan.



Dhanka saacada: 1) Tabarucayaal ku beeraya geedo ku teedsan webiga Duwamish. Lahaanshaha sawirka Paul J. Brown; 2) Daadad ku soo rogmaday agagaarka warshadaha ee South Park. Lahaanshaha sawirka Seattle Public Utilities; 3) Dad si iskaa wax u qabso ah u nadiifinaya webiga Duwamish. Lahaanshaha sawirka Tom Reese.



Waa maxay sababta qof kastaa u daneynayo?



Bulshooyinka adkeysiga leh waxay ugu yeeri jireen Dooxada Duwamish hooy tan iyo wakhti hore - laga bilaabo waqtigii kalluumaysiga iyo jiilaalka kaamka Duwamish Tribe ilaa degayaashii Yurub ee ugu horreeyay, iyo ilaa dadka ku nool maanta.

Laakin wasakhowga deegaanka, kordhinta qiimaha guryaha, iyo saameynta isbedelka cimilada ayaa khatar ku ah dadka degan Dooxada iyo ganacsiyadaba.

Wakaaladda Ilaalinta Deegaanka waxay u aqoosatay dooxada Duwamish goob u baahan nadiifin sanadkii 2001dii. Dadka deggan dooxada, shaqaalaha, iyo ganacsiyada waxay la kulmaan khataro deegaan oo ay ku jiraan wasakhowga warshadaha ee webiga Duwamish; wasakhowga hawada ee waddooyinka waaweyn; la'aanta meelo cagaaran; iyo caqabado kale. Arrimahan ayaa keenaya in celceliska cimriga noloshu siddeed sano uu ka gaaban yahay zip code-kan marka loo eego Seattle iyo King County guud ahaan, iyo 13 inuu sano ka gaaban yahay xaafadaha Seattle ee ka hodansan, ee kala duwan.

Daadadku waxay culaysyo caafimaad iyo mid maaliyadeedba ku hayaan ganacsiyada iyo qoysaska. Qaar ka mid ah meelaha hoose ee South Park iyo Georgetown ayaa durbaba la kulmay daadad la xiriira mowjadaha sare iyo duufaannada roobka. **Daadadku waxay noqon doonaan kuwo aad u daran oo soo noqnoqda marka la gaaro Roobabka jiilaal iyo heerka badda oo sarreeya sababtoo ah isbeddelka cimilada.** Tani waxay yeelan doontaa saameyn dhaqaale oo xun. Wax-soo-saarka iyo isticmaalka warshadaha ee aaggan ay saamaysay kor u kaca heerka badda mustaqbalka waxay soo saarta ku dhawaad \$300 milyan sannadkii waxayna abuurta kumanaan shaqo.

Waxay bilaabatay shaqada in laga dhiso guryo la awoodi karo, hagaajinta dhaqdhaqaaqa, iyo horumarinta meelaha bannaan. **Degmada adkeysiga waxay kordhin kartaa awooda lagu horumariyo xalal dhamaystiran si wax looga qabto caqabadahan.**



Saynis yahanada cimiladu waxay filayaan in heerka baddu uu kor u kici doono 1Foot sanadka 2050, iyo 2 ilaa 5 feet 2100. Seattle waxay leedahay dabaylo jiilaal oo dabayshu ay ku riixi karto heerka biyaha hal feet oo ka sarraysa heerarka caadiga ah. Duufaannada ayaa ah kuwa ugu dhibka badan marka ay ku beegmaan Xiliyada King Tides, kuwaas oo dhaca saddex ama afar jeer sannadkii waxayna ku dari karaan 1.5 cagood oo dheeraad ah. Isku darka waxyaabahan iyo kor u kaca heerka badda ayaa khatar weyn ku ah caafimaadka, badbaadada, waxayna halis gelin doontaa qiyaastii 63 acres oo hanti sanco ah oo ku taal South Park oo daadad sanadle ah leh ila 2070, sida laga soo xigtay a 2017 kii daraasad ay sameeyeen Injineerada Ciidanka Mareykanka.

Sidee dadaalkani uga duwan yahay?

Magaaladu waxay haysaa deeq lacageed si ay bulshada uga caawiso inay hogaamiyan go'aan ka gaadhida horumarka Degmada adkaysiga leh ee Dooxada Duwamish. Deeqdu waxay siisaa bulshada khibrad lataliye iyo taageero kale si ay u qaabeeyaan aragti isku dhafan oo wax ka qabta:



Dadka

Samee qaab-dhismeedka go'aan qaadashada bulshada kaas oo isu keena dadka deegaanka iyo ganacsiyada, kobciya wada shaqaynta hay'adaha dadweynaha, iyo xarumaha cadaaladda deegaanka iyo sinnaanta jinsiyadda.



Siyaasadda & maalgelinta

Waxay hagta horumarinta iyo maalgelinta kaabeayaasha ilaalinta heerka badda ee kor u kaca iyo maalgashiga hagaajinaya caafimaadka iyo sinnaanta.



Goobaha & mashaariicda

Samee istaraatiijiyada la qabsiga kor u kaca heerka badeed oo dhan iyo taageer mashaariicda bulshadu mudnaanta siiso kuwaas oo ka dhasha fursadaha go'aan qaadashada la wadaago, horumarinta iskaashiga, iyo in la daboolo baahiyaha bulshada ee badan.

Waqtiga

2024

Sahaminta

Dadka deggan Dooxada Duwamish iyo ganacsiyadu waxay abaabulaan, qorsheeyaan, abuuraan, oo xakameeyaan xaafad firfircoon, kala duwan, oo tayo sare leh oo leh shuraakado muhiim ah.

- Qorshaha La qabsiga Sarekaca Heerka Sare ee Badda
- Sahaminta Qaab-dhismeedka Ururka
- Samaynta Qaababka Maalgelinta

Wada-hawlgalayaasha Muhiimka ah:

- Magaalada & Wakaaladaha
- Samafalka

2022

Saadka & Hawlgelinta

Abaabulka & Hawlgelinta Bulshada

Daahitaanka COVID

- Isku-dubarid Kooxaha Mashruuca
- Ka qaybgalka Bulshooyinka

2020

Mashruuc Bilaabmay

Bulshada & Wadahadalada Magaalada

- Magaaladu waxay sugtaa maalgelinta aasaaska Robert Wood Johnson
- Baaxadda shaqeed
- Bilow Mashaariicda Hore

Labo iskaashi ayaa horumarin doona mashaariic tusaale u ah go'aan qaadashada bulshada, iskaashiga, iyo maalgelinta.



South Park - Dhameystir habka qorsheynta goobta kaas oo tilmaamaya mudnaanta bulshada ee goobta Unity Electric.



Georgetown - Wanaaji gelida 8th Ave. S iyo Gateway Park North si loogu xidho dadka degan webiga Duwamish.

La qabsiga kor u kaca heerka badda ee Seattle waa lama huraan, marka la eego joog hoose iyo muuqaal hooseedka doxada Duwamish, waa inaan bilownaa **South Park** iyo **Georgetown**. Dadwaynaha iyo Sancooyinku waxay wadaagaan Dooxada Duwamish, mustaqbalka adkaysi ee labaduba waxay u baahan yihiin iscaawin iyo iskaashi xooggan.

Degmada adkaysiga leh waxay gacan ka geysan kartaa abaabulida qof kasta oo ku sugan Dooxada Duwamish si ay u maamulaan dhulalkaan si jiilalka jira iyo kuwa mustaqbalkuba ay ugu noolaadaan oo uguna koraan meeshooda.



Dhibcaha sawirka: dhinaca saacada : 1) David W. Goldberg. 2) Paul J. Brown. 3) Curtis Allan. 4) Mashiinka Inc.

Iskaashiga

Shabakadda iskaashiga ka dhexeeya magaalada Seattle, ururada bulshada, hogaamiyayaasha bulshada, ganacsiyada warshadaha iyo badda, iyo samafalayaasha ayaa muhiim u ah adkeysiga. Xafiiska Joogtaynta & Deegaanka ee Seattle iyo Xafiiska Qorshaynta & Horumarinta Bulshada ayaa hogaaminaya barnaamijka Dooxada Duwamish. Laga soo bilaabo 2016, waaxyaha Magaalada (oo ay ku jiraan Adeegyada Dadweynaha Seattle), ururada bulshada, deganayaasha iyo wakaaladaha, waxay ka shaqeyeen horumarinta cadaalada deegaanka iyo horumarinta sinnaanta waxayna ka abuuraan isbedel wanaagsan Dooxada Duwamish - waxayna bixiyeen barnaamijyo iyo mashaariic badan qaab horumarinaya natiijooyinka sinnaanta jinsiyadda, sida lagu faahfaahiyay **Qorshaha Waxqabadka Dooxada Duwamish**.

Isbahaysiga Bulshada Duwamish River waa mid muhiim ah. Waa isbahaysiga ururada matalaya bulshooyinka ay saameeyeen nadiifinta wabiga Duwamish. Waxay keenaysaa waayo-aragnimadeeda cilmi-baadhis iyo waxqabad ka-qaybgal bulsho-ku-salaysan, iyo xidhiidhkeeda qoto-dheer ee bulshada dhexdeeda. Magaaladu waxay taageeri doontaa kobaca iskaashiga ee Ururada Dooxada Duwamish iyo wakaaladaha inta ay sii wado taageerada Dooxada Duwamish.

Nagu soo biir!

Waanu kuu baahanahay! JKu biir deriskaaga sidii aad u caawiso in dadka deggan Dooxada Duwamish iyo ganacsiyadu inay koraan.

Si aad wax badan uga ogaato booqo www.seattle.gov/dvp ama ku sawir code-ka QR kamaradaada.



Kumanaan Sano, webiga Duwamish waxa uu qaaday waddo macno leh markii uu ku qulqulayay Elliott Bay oo uu sii waday nidaam deegaan oo kala duwan. Horraantii 1900-aadkii, qodista iyo buuxinta waxay abuurtaay marin-biyood la maro waxayna taageertay horumarinta warshadaha ee hareeraha Dooxada Duwamish.

Taageerada mashruucan waxaa bixiyay Robert Wood Johnson Foundation taasoo qayb ka ah Talaabada ay Qaadaysaan Magaalooyinku si wax looga qabto caafimadka, Sinaanta iyo Hindisaha Isbeddelka Cimilada. Aragtiyada halkan lagu sheegay qasab maaha inay ka tarjumayaan aragtida Mu'asasada.